MAXKAMADA GUUD EE DAWWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA



AWAAMIIR TIRSI: 09/2015
AWAAMIIRTA HABKA MAARAYNTA GEEDDI-SOCODKA DACWADAHA MADANIGA AH EE MAXKAMADAHA DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

AWAAMIIR TIRSI: 09/2015

AWAAMIIRTA HABKA MAARAYNTA GEEDDI-SOCODKA DACWADAHA MADANIGA AH EE MAXKAMADAHA DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

Cikaraynta Maxamuud
Guud Ee DDS

GUNBOOT 2015
JIGJIGA, ETHIOPIA

ARAR

Maadaama oo loo baahan yahay in la hirgaliyo hanaan meesha ka saaraya dib u dhaca iyo jiitanka wax u dhimi Kara cadaalada marka laxalinayo Lana fulinayo geedi socodka dacwad dhagaysiga.

Maadaamoo ay lagama-maarmaan tahay in kor loo qaado kalsoonida bulshada iyo qanaca macaamiisha muwaadiniintuna si ku haboon ay wakhti kooban ugu helaan adeeg bixin garsoor oo tayo leh Lana ilaalinayo miisaanka madaxbanaanida iyo laxisaabtanka garsoorka. Islmarkaasina la hirgaliyo nidaam lagu jaan goynayo waqti ay dacwadaha/arimaha madanigu ku dhamaadaan/xalna ku helaan iyada oo lookala soocayo noocooda iyo xaaladahooga gaar ka u ah, si ay macaamiishu si sinaansho leh uga wada faa-iideystaan adeeg bixinta garsoorka.

Si loo suurto galiyo xaqiijinta la xisaabtanka garsoorka, meeshana looga saaro dib u dhaca caddaaladda iyadoo la abuurayo dhaqan shaqo iyo hanaan suurto galinaya in muddo kooban gudaheed lagu helo adeeg bixin garsoor oo degdeg iyo ka gungaadhid leh.

Ayaa guddiga maamulka garsoorka oo ka duulaya awoodda lagu siiyay bayaanka tirsigiisuyahay 216/2014 qodobkiisa 12aad waxa uu soo saaray awaamiirtan:

QAYBTA KOOWAAD

GUUD AHAAN

1. CIWAAN GAABAN

Awaamiirtan waxaa loogu yeedhi karaa awaamiirta habka maareynta geeddi-socodka dacwadaha madaniga ah ee Maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalida ee tirsigeedu yahay: 09/2015.

2. EREY-BIXIN

Haddii anuu eraygu tuducda uu ku jiro macno kale siinin awaamiirtan dhexdeeda:-

b) "**maareynta habka fulinta arimaha madaniga"** waxaa loola jeeda habraaca suurto galinaya in sidedgdeg siinyo leh loogu maareeyo geedi socodka arimaha/dacwadaha maxkamadaha la horkeeno''

t) **"maalinta ballanta"** waxaa loola jeedaa, geedi socodka dhexdiisa, maalinta loo cayimay fulinta ama qabashada hawlaha shaqo ee la fulinayo::

j) "**xadka muddada"** waxaa loola jeedaa, geedi socodka dhexdiisa, waqtiga kama danbaysta ah ee loo dejiyay in lagu dhamaystiro ama xal lagaga gaadho arinta

x) **"Arimaha wareegay"** waxaa loola jeedaa arimaha aanan ku dhamaanin ama xal ku helin guud ahaan xadka waqti ee loo dajiyay.

Kh) **"Arimaha dhamaaday ama xalka helay"** waxaa loola jeedaa arimaha xal ku helay ama ku dhamaaday amar, go'aan ama xukun maxkamadeed.

d) **"dhinacyada is-haya"** waxaa loola jeedaa dhinacyada qaybta ka ah arrin/dacwad madani oo maxkamada loo keenay ku waasi oo ay kamidyihiin:- dacwoode, dacweysane, soo dhex-gale, codsade, jawaabceliye, racfaanle racfaansane, xeer ilaaliye iyo dhinacyada kale ee qaybta ka ah dacwada waxaa kale oo ku jira ama loola jeedaa qareenada , wakiilada iyo dhameeyayaasha dhinacyada is haya::

r) **"Madax fadhi"** waxaa loola jeedaa fadhi garsoorka ka kooban sadex xubnood iyo in kabadan garsooraha hogaamiya/shir gudoomiya.

s) **"Gudoomiye"** waxaa loola leedaa gudoomiye yaasha heerarka kala duwan ee maxkamadaha deegaanka macnahan waxaa kale oo ku jira gudoomiye ku xigeenka maxkamadda guud.

3. XADKA DHAQAN GALKA

Awaamiirtan waxaa lagu dhaqan galinayaa dacwadaha madabiga ee laga furo maxkamadda guud, maxkamadaha gobolada, maxkamadaha degmooyinka iyo maxkamadaha maamul magaalooyinka.

QAYBTA LABAAD

YOOLKA IYO UJEEDDADA MAAREYNTA DACWADAHA MADANIGA

4. UJEEDDADA

Ujeeddada awaamiirta maareynta geedi socodka arimaha madanigu waa in habraacyada sharci lagu kabo hanaan suurto galinaya bixinta adeeg bixin garsoor oo tayo iyo degdegsiinyo leh.

5. UJEEDADA

Ujeedada awaamiirtani waa:

1. In meesha laga saaro dib u dhaca ku yimaada dacwadaha waqtiga xal u helista iyo dhamaystirkooda;
2. In kor loo qaado kalsoonida iyo qanaca muwaadiniinta ee kuwajahan hawlaha garsoorka;
3. In tixgalin isku dhaw dhaw la siiyo dacwadaha/arimha madaniga iyada oo laga duulayo nuucooda iyo xaaladahooga;
4. In geedi socodka xalinta iyo dhamaystirka dacwada laga dhigo mid ay dhamaan dhinacyada dacwada isku hayaa filan karaan;
5. In kor loo qaado tayada wax qabad ee hawlaha geedi socodka arimaha dcawada/madaniga.

QAYBTA SADDEXAAD

6. KALA HOREYNSIINTA DACWADAHA FADHIGA FURAN

6.1. fadhiga furan iyo saacadaha shaqo ee maxkamadda

1. Marka laga reebo arimaha uu sharcigu sida khaaska ah ugu amray in fadhi xidhan lagu eego, hawlaha garsoorka waxaa lagu eegi fadhi furan qolka dacwad qaadista dhexdeeda.
2. Iyada oo saacadaha ay dawladu u dajisay in shaqada la soo galo lagana baxo ay sideeda tahay saacadaha shaqada ee maxkamadu/jiloodku waxay noqonayaan sidan: waxaa shaqada la bilaabi gelinka hore 8:30 subaxnimo iyo gelinta dambe 2:30 duhurnimo.

3. Arinta lagu sheegay qodob hoosaadka 2aad ee qodobkan iyada oo ay sideeda tahay, ayaa gudoomiyaha maxkamada guud waxa uu awaamiir ku soo saari karaa saacado midaas ka duwan iyada oo laga duulayo cimilada iyio axwaasha kale ee maxkamadaha degmooyinka iyo goboladda deegaanka u gaarka ah::

4. Inta aanan awaamiirtaasi ku xusan qodobka sadexaad la soo saarin saacadaha shaqo ee ku xusan qodobka 2aad waxay dhaqan gal ku yihiin dhamaan maxkamadaha heerarkooda kala duwan ee deegaanka.

7. KALA HOREYSIINTA DACWADAHA

1. Iyada oo laga duulayo amar, goáan ama xukun maxkamadeed, dacwadaha uu fadhiga dib u eegistu ama fadhiga racfaanku dib u gu soo celiyay maxkamadaha hoose si ay geedi socodka u wadaan ama dib u gu dhagaystaan ayaa dhamasystirkooda ama xal siintooda la horeysiinayaa :

2. Iyada oo arinta lagu sheegay qodob hoosaadka 1aad ee qodobkan ay sideeda tahay, ayaa garsooruhu/garsooreyaashu iyaga oo ka duulaya goáan iskood ah ama codsi dhinacyadu u soo gudbiyeen, ayaa xaalada deg deg siinyo ee dacwada/arinta, xaalada caafimaad ama da'eed ee dhinacyada darteed waa lookala horumarin karaa xal siinta iyo dhamaystirka dacwadaha:

3. Caruurta, naafada iyo hooyada uurka leh dacwadaha ay dhinacyada ka yihiin ayaa xal siintooda iyo dhamaystirkooda laga horeysiin dacwdaha kale::

4. Dacwadaha khuseeya mashaariicaha horumarineed ee dalka faa'iido dhaqaale oo sare u leh, gaar ahaana hadii ay jirto amar xayiraad ah oo arintaasi laga bixiyay ayaa xal siintooda iyo dhamyastirkooda mudnaanta laga siin ama laga horeysiin dacwadaha kale:

5. Dacwadaha/ arimaha madanigu marka ay geedi socodka ku jiraan, cabashooyinka la xidhiidha ee loo soo dhawaysto si waafaqsan habka xeerka madaniga, waxaa loo dhamaystiri xalna loo siini si aanan dib u dhac ku keenaynin geedi socodka iyo mudadda loo dajiyay in ay dacwadaha madanigu ku dhamaadaan.

QAYBTA AFRAAD
NIDAAMKA BALLAN-SIINTA

8. NIDAAMKA BALAN-SIINTA

1. Tiir ahaan maxkamadaha waxa laga filayaa in balamaha ay qabanayaan ku saleeyaan oo kaliya sida uu xeerinayo habka xeerka madaniga ee ku haboon iyo habraacyada ku xusan bayaanada kale ee arinta xidhiidhka la leh. Balanta la qabtayna waa in ay tahay mid la hubo lana oofiyo::
2. Hanaanka mudaynta dacwadaha waxaa layskugu xigxigsiin/lookala hormarin iyada oo laga duulayo sida ay u kala adag/murugsan yuihiin, xadka muddo ee loo dajiyay iyo heerka ay geedi socodka ka marayaan/gaadheen::

9. U YEEDHISTA

Jawaabta dacwada waa in lagu soo gudbiyo muddo aan ka badnayn 15 cisho gudaheeda taasi oo laga bilaabayo maalinta dacwada lagaadhsiiyay dhinaca kale ama isaga oo xaadir ah jiloodka dhexdiisa laga amray. Si kasteba ha ahaatee iyada oo laga duulayo murugsanaanta arinta ama latixgalinayo arimo kale oo maan gal ah waxaa garsooraha ufuran in uu siiyo mudo dheeri ah. Haseyeeshe mudadaasi dheeriga ahi waa in aanay sinaba uga badanin muddada ku dejisan qodobka 10aad dhexdiisa.

10. KALA GUDDOOMIDDA DACWADAHA QORAALKA AH

Laga bilaabo maalinta lagu amray in macmiilka ay arintu khusayso uu yeedhista gaadhsiiyo dhinaca kale waa in 45 cisho (Shan iyo afartan cisho) mudo aan ka badnayn

gudaheed lagu dhamaystiro kala gudoomida jawaabta iyo jawaabta jawaabcilinta dacwada arimaha lagu eegayo heer racfaan kolba sida ay lagama maar maan ka u tahay. Sidookale arimaha laga codsaday in uu soo dhaweeyo dhinac sadexaad ama cadaymaha qoraalka ah eek u jira gacanta dhinacyada waa in lagu soo dhaweyo mudaddan 45ka cisho gudahood.

11. XAL SIINTA IYO DHAMAYSTIRKA ARIMAHA LA SOO DHAWEEYAY

1. kadib marka ladhamaystiro dhagaysiga dooda iyo cadaymaha iyada oo aanan la sugaynin xadka mudo ee kamadanbaysta ah ee ay awaamiirtani xeerinayso waa in arinta 30 cisho gudeheed lagu dhamaystiraa::
2. Hadii ay jirto sabab macquul ah oo aanan arinta loogu dhamaystiri karaynin mudo xadeedka qodob hoosaadka 1aad ee qodobkan 11aad ku xusan waxaa lagu dhamaystiri mudo xadeedka guud ee awaamiirtan ee arintan/noocan dacwada loo dajiyay.

12. BALLANTA

1. Ballanta waa in loo qabto oo kaliya si loo fuliyo ama loo soo qabto hawsha ballanta loo bixiyay ee lagamamaarmaanka ka dhigtay balanta. Ballanta laqabtayna waa in ay tahay mid kufilan soo qabashada hawsha loo balamiyay.
2. Ahmiyada ugu weyn ee laga leeyahay balan bixintu waa in balahama loo maareeyo hanaan suurto galinaya in ay dacwaduhu/arimaha madanigu ku dhamaadaan xalna ku helaan muddo xadeedka loo dejiyay.
3. Hanaanka qabashada ballantu waa in uu ahaado mid si cad loogu qeexayo saacada, iyo maalinta. Nis ka hore iyo niska danbe midkuu yahayna lagu sheegayo sidaasna macaamiisha lagu ogeysiinayo.
4. baaxada balanta la qabanayo ama inta maalmood ee ay noqonayso waxaa goáaminaya oo ay ku xidhantahay xaalada hawsha/shaqada in la soo qabto balanta loo bixiyay:

5. Markaste balamaha la qabanayo waa in aanay ka sareynin kana hoos marin baaaxad ahaan iyo fulin ahaanba inta karaan ka ah ee kolba hawlaha ay tahay in la soo qabto balantana iyaga dartood loo bixiyay:
6. Marka la qabanayo ballan la xidhiidha shaqooyinka jiloodka waa in loo qabtaa hanaan aanan keensanaynin su'aal/codsi ballan bedel:
7. Marka la bixinayo balanta waa in aan lays dhexgalin lana kala sooco hawlaha laqabto dhagaysiga hore, dooda kahor, kuwa la qabto xiliga dooda iyo kuwa la qabto xiliga xukun bixinta::
8. Marka laga reebo arinta lagu sheegay qodob hoosaadka 7aad ee qodobkan arimaha kale ee in la soo qabto/fuliyo balanta loogu qabtay, si wadar ah oo aan kala sooc sooc/kala Saar saarid lahayn ayaa balanta loogu qabanayaa.

13. HABKA BALLAN BEDELKA/DIB-U MEDAYNTA

Iyadoo ay sideeda tahay arimaha kale ee lagu xeeriyay sharciyo kale dib u mudeynta ama balan dheeri ah laguma bixin karo maadaama oo la codsaday oo kaliya. Si kasteba ha ahaatee dib-umudaynta ama ballanta dheeriga ah waxaa lagu bixin karaa ama lagu diidi karaa iyada oo tixgalin la siinayo arimahan soo socda;

1. Iyadoo la miisaamayo caqabada ama duruufta sabata u ah codsiga balanta dheeriga ah/dib u medaynta, in aanay jirin wado kale oo duruuftaasi ama caqabadaasi lagu sixi karo:
2. Balanta dheeriga ah/dib u medaynta inta aan la codsan kahor in la xaqiijiyo ka go'naanshaha la xidhiidha xalinta caqabada ama duruufta sababta u ah codsiga balanta dheeriga ah/dib u medaynta:

3. Iyada oo lagu xisaabtamayo arinta loo codsaday ballanta dheeriga ah inta/muddada ay geedi socodka kujirtay:
4. Iyada oo lakala soocayo in hada kohor arintan laga bixiyay balan dheeri ah ama dib loo mudeeay, ama in ta la soo dhaweystay codsi balan dheeri ah/dib u medeyn ku saabsan la ogolaaday ama la diiday:
5. Iyada oo tix galin la siinayo laguna xisaabtamayo in Balanta dheeriga ah/dib u medayntu jiitanka ay ku keenayso dacwada darteed aanay wax u dhimaynin xuquuqda dhinaca kale ee la xidhiidha in uu waqti kooban gudaheed ku helo cadaalad iyo adeeg bixin garsoor oo degdegsiinyo leh:
6. Iyada oo lagu xisaabtamayo maankana lagu hayo in ballanta dheeriga ah/dib u mudeyntu aanay suurto gal la'aan ka dhigaynin in arintu xalku hesho/kuna dhamaato muddo xadeedka loo dajiyay:
7. Arinta lagu sheegay qodob hoosaadka 1-7aad ee qodobkan iyada oo ay sideeda tahay, wax ka reebayaayi majiraan in garsooruhu dib u mudeeyo ama bixiyo ballan dheeri ah hadii uu aqoonsado in ay jiraan sababo kale oo macquul ah oo xalaaleynaya in balan dheeri ah la siiyo ama dib loo mudeeyo.

QAYBTA SHANAAD

MAAREYNTA GEEDI SOCODKA ARIMAHA MADANIGA XILKA IYO WAAJIBAADKA DHINACYADA KALA DUWAN

14. Tiirarka dabagalka heerarka geedi socodka

1. Galdacwadeedka maalinta lafuray ilaa maalinta xukun laga siinayo Meertada istaraysa ee geedi socodka waa in ladaba galaa si aanay u kala go'in.
2. Marka la qabanayo shaqooyinka la xidhiidha dacwadaha gacanta la gu hayo kolba meertada ay u gudbayaan waa in laga qaataa talaabooyinka dabagalka iyo sicxitaanka:

3. Waa in la sameeyo talaabooyin lagu daba galayo in aanay kala go'in meertada geedi socodku marka ay shaqooyinku heerkii horey ay u taagnaayeen ee geedi socoka dhexdiisa ka gudbayaan una gudbayaan darajo kale.

15. XILKA IYO WAAJIBAADKA GUDOOMIYAHA

Iyada oo xilka iyo waajibaadyada lagu siiyay shuruuc kale ay sideeda tahay, gudoomiyuhuh awaamiirtan fulinteeda waxa uu ku leeyahay xilka iyo waajibaadyadan soo socda:-

1. Waxa uu dabagalaa dhaqangalka awaamiirta maaareynta arimaha madaniga, kormeerka, qaadashada iyo suurto galinta in la qaato talaabooyinka sixitaan ee geedi socodka dhexdeeda iyo sidookale in la soo diro warbixinta dhaqan galka awaamiirtan.
2. Waxa uu talaabo ka qaataa sidookalena suurto galiyaa in laga qaato kala soocida, xalinta iyo diyaarintaf dood cilmiyeed la xidhiidha sababaha arimo dibadeed iyo kuwo gudo awgeed ay dacwaduhu/araimaha madanigu ugu dhamaan waayeen ama xal ugu heliwaayeen muddo xadeedkii loo dajiyay.
3. Rejisterraalda, khabiirada maareynta geedi socodka arimaha madaniga, kalkaaliyayaasha garsoorka, maamulka xogta iyo galdacwadeedyada iyo shaqaalaha kale waxaa iyagana laga filayaa xaqiijinta ka shaqeynta hawlaha lagu dhaqan galinayo awaamiirtan.
4. Wuxuu suurto galiyaa in la helo aqoonta, xirfada, iyo khibradaha wanaagsan ee loogu baahan yahay in lagaga midho dhaliyo hawlaha shaqo ee geedi socodka arimaha madaniga loona fuliyo si waa faqsan awaamiirtan.
5. Waxa suurto galiyaa sidii looga midho dhalin lahaa geedi socodka maareynta arimaha madaniga isaga oo dacwadaha u kala shaandheynaya sida ay kala yihiin

sidoo kalena waxa uu qaabdhismeedka jiloodka ku hawlgaliyaa shaqaalaha ku haboon, waxa kale oo uu fuliyaa hawlaha kale ee muhiimka ah.

6. Waxa kale oo uu qabtaa hawlaha kale eel agama maarmaanka u ah hirgalinta awamiirtan maareynta geedisocodka arimaha madaniga.

16. XILKA IYO WAAJIBAADKA MADAX FADHIGA

Garsooraha madax fadhiga ah, iyadoo ay sideeda tahay xilka iyo waajibaadka ay saarayaan shuruuc kale ayaa hirgalinta awaamiirtan waxa uu kuleeyahay xilka iyo waajibaadyadan soo socda :-

1. Waa in uu fuliyo hawlaha maamul ee suurto galinaya in shaqooyinka laga qabanayo geedi socodka dacwad qaadista dhexdiisa ee la xidhiidha adeegbixinta garsoorka laga dhigo mid si sahlan lagu helikaro, degdegsiinyo leh Lana filan karo.
2. Wuxuu si dhaw ula socon una dabagali in dacwaduhu/arimaha madanigu ku dhamaadaan xalna ku helaan muddo xadeedkii loo dajiyay, sida uu u daba galay geedisocodka fulintoodana waa uu kawar bixiyaa, talaabooyin sixitaana waa uu ka qaataa.
3. Waxa uu qabtaa hawlaha kale ee looga gol leeyahay in awaamiirta maareynta arimaha/dacwadaha madaniga hirgalinteeda arimaha xidhiidhka la leh lagu adkeeyo dhinacyadeeda adag, dhinacyadeeda jilicsana la sooco iyada oo dib u habeyn lagu sameynayo sidoo kalena la soo saaro figradaha cusub ee ay tahay in awaamiirtan lagu daro.
4. Waxa uu qabtaa hawlaha lagu xoojinayo in xaaladaha ballan bixinta ballan bedelka iyo ballanta dheeriga ahiba aanay noqon kuwo dib u dhac ku keena geedi socodka.

5. Iyada oo laga duulayo ku dhamaanshaha arimaha/dacwadaha muddo xadeedka loo dajiyay waxaa uu garsooreyaasha fadhiga ogeysiiya heerka shaqo fulinta: cida ay khusaysana warbixin ayuu kasiiyaa.

6. Waxa uu suurto galiyaa in shaqaalaha kale ee taakulayntu ay dhaqangalinta awaamiirtan ka qaataan doorkooda kaga aadan.

7. Waxa uu garsooreyaasha kala xaajoodaa arimaha keenaya in dacwaduhu/arimuhu ay ku dhamaadan xalna ku helaan muddo xadeedkii loo dajiyay isaga oo u kala soocaya asbaaabo, dibadeed ama gudeed. Sidookalena isaga oo ka duulaya isfahanka ay wada xaajoodka ku gaadheen ayuu qaataa ama in laqaato ku ogeysiiyaa dhinaca ay khusayso.

17. XILKA IYO WAAJIBAADKA GARSOOREYAASHA

Garsooreyaashu hirgalinta awaamiirtan waxa ay ku leeyihiin xilka iyo waajibaadkan soo socda:-

1. Waa in uu dabagalaa in aanu hakad galin ama istaagin meertada geedi socodka ee isa soo taraysa si waafaqsan dacwadaha dabeecadahooga kala duwan iyo sida loo kala saaray. Kadibna inta aanu dhamaansho ku dhawaanin geedi socodku soo dhexgalaa kana qaataa talaabooyinka sixitaan ee loo baahanyahay.
2. Waxa uu suurto galiyaa in arimuhu ku dhamaadaan muddo xadeedkii loogu talogalay.
3. Waa in uu xaqiijiyo in hawlaha shaqo e jiloodku ay yihiin kuwo faa'iido u leh meertada geedisicodka dacwadaha/arimaha iyo wakhtiga iyo maalka dhinacyada macaamiisha ah.
4. Go'aaminta, in hawlaha soo qabashadooda/fulintooda amarka laga bixiyay loo fuliyo hanaan suurto galinaya in ay xal ku helaan kuna dhamaadaan xadka muddo ee loo dajiyay gudahood.

5. Isaga oo ka duulaya tixgalinta ku haboona siinaya noocyada iyo xaaladaha gaarka u ah dacwada/arimaha Waa in uu suurto galiyaa sidii loo dadajin lahaa geedi socodka arimaha/dacwadaha.

6. Waa in uu geedi socodka hogaamiyaa isaga oo eegaya sida dacwadaha/ arimaha madaniga jaantuska dhexdeeda loogu kala soocay kuwo fudud, dhexe iyo waliba kaknaantooda iyada oo laga duulayo xaaladaha gaarka u ah dacwada/arimaha.

7. Waa in uu suurto galiyaa in macaamiisha ama dhinacyada dacwada isku hayaayi ay marka hore khilaafkooda heshiish kusoo dhameystaan.

8. Waxa uu cida ay khusayso warbixin ka siiyaa Shaqooyinka loo qabtay/fuliyay si waafaqsan awamiirtan.

9. Waxa uu balan cad ka bixiyaa shaqooyinka iyo hawlaha la qabanayo Geedi socodka dhagaysiga ee dooda kahor.

10. Waxa uu balan cad ka bixiyaa shaqooyinka iyo hawlaha la qabanayo Geedi socodka dhagaysiga dooda.

11. Waa in uu sida ugu haboon diyaar garaw ku filan ka soo sameeyaa arin kaste oo la xidhiidha shaqada jiloodka/geedisiocodka dacwad dhagaysiga.

12. Dhagaysiga u horeeya ee dacwada waa in uu dhinacyada xasuusiyaa in ay soo xaadiraan, iyaga oo sida ugu haboon u soo diyaar garoobaya, sidoo kalena waa in uu xaqiijiyaa isaga oo soo gunaanadaya in la fuliyay/dhamaystiray shaqooyinka ku hoos dhacaya dhagaysiga koobaad.

13. Kahor in ta aan lagudo galin balan siinta dhagaysiga koowaad ama dhagaysiga markhaatiyada Waa in uu xaqiijiyo qodobadan soo socda;

    b) In ay jirto baahi loo qabo turjumaanada luuqadaha iyo kuwa dhagoolayaasha kolba sida ay xaaladu ku haboontahay.

t) xaqiijinta in ay diyaar yihiin qalabka cod duubayaasha geedi socodka

j) Xaqiijinta in dhinacyadu ay soo dhawaadeen iyaga oo soo dhamaystiray markhaatiyadooda.

14. Hawlaha shaqo ee daba socda Talaabooyinka kala gudoomida qoraalada dacwada iyada oo sida ay u kala horeeyaan loo fulinayo laguna saleynayo fikirka dhinacyada ayaa loo diyaarin qorshe/tub lagu fulinayo waxaana la suurto galin in xalsiintoodu ku dhamaato mudada qorshaha/tubtaasi sida gaarka ah loogu dajiyay.

15. Kolba sida ay suurtogalka u tahay hadii hawlaha laqabanayaayi ay hal/mid ka badan yihiin in ta hal lagu soo ururiyo ayaa la suurto galin hal ballan in looqabto.

18. XILKA IYO WAAJIBAADKA DHINACYADA

Hirgalinta awaamiirtran waxaa dhinacyada ka saran xilka iyo waajibaadkan soo socda:-

1. Arin kaste oo shaqooyinka geedi socodka ka mid ah iyo fulinta hawlaha ballamaha loo bixiyo waa in loo hirgaliyaa si anshax sugan leh.

2. Kadib marka geedi socodka dacwad dhagaysigu dhamaado waa in shaqooyinka suurto galinya xal siinta dacwada loo fuliyaa hanaan milgo iyo anshax sare ku dheehanyahay.

3. Waa in aanan la soo dhaweynin cabashooyinka aan macquulka ahayn islamarkaasina dib u dhac ku keenaya geedi socodka iyo mudada loo dajiyay dhamaystirka/xalsiinta arinta.

4. Dhawrista iyo fulinta amarada maxkamadaha.

19. XILKA IYO WAJIBAADKA REJISTERAALADA

Rejisteraaladu xilka iyo waajibaadka ay shuruucda iyo habshaqeedyadu saarayaan iyada oo ay sideeda tahay, waxa ay yeelanayaan xilka iyo waajibaadyadanm soo socda:-

1. Waa in uu gal dacwadeedka u dhaweeyo ama ku meeleeyo fadhiga ay khusayso isaga oo arimaha/dcwadaha la soo codsaday in la furo u kala eegaya halka ay kala hoos tagayaan nuuc ahaan sida loo kala qoondeeyay hab waafaqsan hanaanka awaamiirtan lagu dejiyay

2. Isaga oo ka duulaya qodobka sare ku xusan arimaha lakala soocay , waa in waqtiga awaamiirtan dhexdeeda loogu dejiyay in ay ku dhamaadaan ama xal ku helaan uu ogaysiiyaa dhinacyada:

3. Waxaa xil iyo waajibaad ka saaran yahay qabashada dhamaan hawlaha xidhiidhka la leh dhaqangalinta awaamiirtan si milgo iyo anshax sare ku dheehan tahay.

20. XILKA IYO WAAJIBAADKA GADHWADEENKA WAAXDA MAAREYNTA GEEDISOCODKA DACWADAHA MADANIGA

1. Iyada oo ay sidooda yihiin xilka iyo waajibadka shaqo ee lagu siiyay shuruucda iyo habraacyada kale, haddana gadhwadeenka waaxda geeddi-socodka maamulka dacwadaha madanigu leeyahay awoodahan iyo waajibadka soo socda;

b) Maamulka iyo maaraynta macluumadka la xidhiidha hab-socodka kiisaska, laga bilaabo maalinta diiwaanka la furay ilaa iyo muddada laga xalinaayo;

t) Wuxuu sargooya muddada kama dambaysta geeddisocodka dacwadaha madaniga isagoo adeegsanaya cabbirka halbeegayada waxqabadka, islamarkaana wuxuu natiijada u gudbiyaa cidda ay khusayso;

j) Wuxuu diyaariyaa tirakoobka tafaasiisha macluumadka ee ku saabsan marxaladaha iyo heerka geeddi-socodka dacwaduhu ay marayaan iyo waxqabadka la xidhiidha, wuxuuna u gud-biyaa cidda ay khusayso;

x) Wuxuu meel-mariyaa hindisaha dibu habaynta fikradaha lagama-maarmaanka ah, Iyada oo uu kala saarayo dhinacyada wanaagsan iyo caqabadaha xaddidaaya, islamarkaana wuxuu dardargelinaya dhaqan-galinta hab-raacyada la xidhiidha arrimaha maamulka iyo maaraynta geeddi-socodka.

Kh) Taabo-galinta waajibaadyada kale ee lagaga gungaadhayo hawlaha maamulka geeddi-socodka dacwadaha.

21. AWOODDA IYO WAAJIBAADKA LA XISAABTANKA HAY'ADDEED

1. Maxkamad kastaa waa inay samaysaa waxyaabaha soo socda:-

b) Samaynta taageerada lagama maarmaanka ah, iyadoo fullinta dacwad qaadista/dhagaysiga laga codsaday lagu salaynaayo xilli muddeedka lagu faahfaahiyay awaamirtan.

t) Samaynta nidaamka isgaadhsinta elegtarooniga iyo adeegsiga warbaahinta, si ay dadweynuhu u helaan habraacyada ku salaysan geeddi-socodka dacwadaha madaniga.

j) U shaacinta bulshada guud ahaan dacwadaha guud ee lagu xaliyay muddadii loogu talo-galay, dacwadaha aan lagu xalinin, iyo miisaamida halbeega xaqiijinta hawlaha shaqo fulinta ee dacwadaha la fulliyay.

x) Qaadista talaabooyinka lagama-maarmaanka ah, fulinta iyo dib u habeynta mudo xadeedka lagu dajiyay awaamiirtan dhexdeeda;

Kh) Hirgelinta istiraatijiyadaha muhiimka u ah ka gun gaadhista waxqabadka, oo ku salaysan mabaadii'da maaraynta geeddi-socodka dacwadaha, islamarkaana ay diyaariso buug gacmeedyada lagama-maarmaanka uu ah hirgelinta awaamiirtan

d) Hirgelinta istaraatiijiyadaha iyo habraaca ku saabsan baadhitaanada diwaanada dacwadaha aan lagu xallinin muddadii guud ee loogu talo galay;

3. Fullin la'aanta faqrada (1) ee qodobkan, waxay keenaysaa la xisaabtan hay'adeed.

4. Habraaca xaqiijinta isla xisaabtanka waxaa soo saaraysa Maxkamadda guud ee DDS.

QAYBTA LIXAAD

MUDDADA KAMA DAMBAYSTA AH EE XALLINTA DACWADAHA, NATIIJADA LA FILAAYO IYO MUDDADA HIRGALINTA HALBEEGYADA WAXQABADKA

22. NOOCA DACWADDA, MUDDADA LAGU XALINAYO IYO NATIIJADA LA FILLAAYO

1. Waxaa la samaynayaa in maxkamad kasta ay lahaato muddo xaddidan oo ay kaga go'aan gaadho kiis walba oo aloo soo gudbiyo, islamarkaana natiijo laga filaayo, iyada oo loo eegayo nooca dacwadda.

2. Arrimaha ay eegayso maxkamad kasta waa in ay u fulliso geeddisocodka dacwadaha hab waafaqsan sida ku dhigan shaxda koowaad ee lifaaqa awaamiirtan Iyadoo lagu saleynayo muddo xaddidan oo lagu xaliyo iyo muddo Kama dambaysta

3. Garsoorayaasha waxaa looga baahan yahay in ay xaqiijiyaan dacwadaha lagu dhammeeyey hab waafaqsan habraaca maaraynta geeddi-socodka dacwadaha

iyo natiijada la filayo iyadoo la raacayo shaxda ku lifaaqan, lifaaqa koowaad ee awaamiirtan.

23. HALBEEG-YADA CABBIRKA EE MUDDADA FULLINTA

1. Waxaa la sameeyay muddo xaddiyeed guud oo ka kooban xilli xaddiyeedyo kala duwan. Waxayna u kala qaybsamaan; muddo xaddiyeed bilawga ah, muddo xaddiyeed dhexdhexaada iyo muddo xaddiyeed guud.

2. Ujeeddada Jaan-goynta jadwalka muddadu wuxuu ka bilaabmayaa maalinta dacwadda la furay, wuxuuna ku dhammaanayaa muddada Kama dambaysta ah ee ay dacwaddu xalka heshay/go'áamiyay.

3. Iyadoo ay sideeda tahay arrinta lagu sheegay qodobhoosaadka 2aad ee qodobkan xaddiga muddada dhagaysiga dacwadaha racfaanku waxay ka bilaabanayaan maalinta uu kalandarku bilaabmayo.

4. Jihooyinka tilmaameyaasha waxqabadka muhiimka ah iyo halbeegyada cabbirka muddadu waxay noqonayaan boqolleyda ah; Heerka baadhista kiisaska boqolkiba (%), muddada la xaliyay boqolkiba (%) iyo ciddo-tirsiga kiisaska boqolkiba (%).

   Iyadoo loo fullinayo jadwalka tilmaamayaasha waxqabadka muhiimka ah iyo halbeegyada cabbirka muddo kasta sida ku cad lifaaqa 2 ee awaamirtan, sido kale waxaa qaabka la socodka iyo warbixinta waxqabadka lagu salaynayaa sida ku qeexan lifaaqa 3^{aad}. Waxaa Foomkan wax kabadal iyo dibu habayn lagu samayn karaa hadba sida loogu baahdo.

QAYBTA TODDOBAAD
QODOBO KALA DUWAN

24. ISKAASHIGA

Dhinacyada is haya iyaga oo samaynaya diyargarow ku filan oo dhanka geeddisocodka dacwadaha ah; waxay mas'uul ka yihiin inay iska kaashadaan wax kasto ay awoodaan, si looga gun-gaadho geeddisocodka dacwadda iyo fullinta xiligi loogu talogalay.

25. DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGAAMISO

1 Inta aan geedi socodka dhagaysiga dacwada la gudo galin ka hor, Waxaa ahmiyad iyo u kuurgalba loo yeelan in dhinacyada is haya ay heshiis ku dhameeyaan khilaafkooda.

2 Waa in hawlaha geeddisocodka dhexdhexadintu ay ku dhamaystirmaan 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta uu garsooruhu amarka bixiyay. Hasayeeshe, marka uu garsooruhu ogaado inay jirto sabab macquul ah, waxaa uu samayn[redacted]aa muddo kordhin dheeraada oo aan ka badnayn hal mar oo keliya, islamarkaana aan ka badnaan Karin muido 20 maalmood ah

3 Iyadoo ay sidooda yihiin arrimaha ku xusan faqradra (1) iyo (2) ee qodobkan, waxaa nidaamka dhexdhexaadinta maxkamaddu hoggaamiso loo fullinaya hab waafaqsan habraaca loo diyaariyey.

26. HAWLAHA LA MAMNUUCAY

1. In iyadoo aan la qorshaynin islamarkaana aan lagalinin, database in garsoorayaasha iyo/ama shaqaalaha kale ay khusayso ee maamulku ay gacanta ku hayaan kiiska.
2. Samaynta falal wax udhimaya ixtiraamka iyo kalsoonida dhinacyada ay maxkamadda u qabaan.

3. Gacan ka geysiga dib u habeynta kiisaska.
4. Siinta muddo ballameed dheer oo ka badan muddadi loogu talogalay qabashada hawsha.
5. Baadhitaannada iyo diiwaannada maalinlaha ah oo hab dhammaystiran looguso bandhigi waayo garsoorayaasha ama fadhiga marka ay ku habboon tahay, islamarkaana danlayda lagu dhibaataynayo dib u dhigista ballanta.

27. WAX KA BEDDELKA AWAAMIIRTA

Awaamiirtan waxaa waxka beddeli Kara ama dibu-habayn ku samayn kara maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalida.

28. MUDDADA DHAQAN-GALKA

Waxay awaamiirtani dhaqan galaysaa laga bilaabo bisha Ginboot 1, 2015 T.I. Hasayeeshe, waxay qaadan karta muddo labo bilood oo diyaargarow ah.

Cali Baarud Sheikh Axmad

Guddoomiyaha Maxkamadda Guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalida

LIFAAQA KOOWAAD

SAR-GOYNTA MUDDADA KAMA DAMBAYSTA GEEDDI-SOCODKA DACWADAHA MADANIGA IYO NATIIJADA LA FILAYO

1. MAXKAMADDA GUUD EE DAWLADDA DEEGANKA SOOMAALIDA

Tr	Maxkamada	Fadhiga ay dacwaddu ka qabsoomayso	Geeddisocodka dacwadaha bilow ila dhammaad	Nooca dacwadda	Sar-goynta muddada kama dambaysta ee geeddi-socodka dacwadaha madaniga iyo natiijada la filayo		
					Muddada bilawga 85%	Muddada dhexdhexadka 95%	muddada guud ee kama dambaysta 100%
1	Maxkamadda guud ee DDS	Fadhiga Racfaanka madaniga	Hab-socodka dacwadda laga bilaabo fayl-furka ilaa iyo maalinta la fulliya	Arrimaha la xidhiidha heshiisyada Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka ka baxsan heshiiska	120 Maalmood	210 Maalmood	270 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha dhaxalka; Arrimaha la xidhiidha qoyska ee furiinka (gabadha iyo ninkeeda) iyo asbaabaha ka dhasha furiinka, iyo wixii la xidhiidha;	120 Maalmood	180 Maalmood	240 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha shuruucda Ganacsiga; -Arrimaha ku saabsan tartanka ganacsiga iyo xuquuqda quutayasha	120 Maalmood	180 Maalmood	240 Maalmood
				-Khilaafadka la xidhiidha lahaansha hantida, gacan ku haynta iyo arrima la xidhiidha heshiiska (konteradka)	120 Maalmood	180 Maalmood	210 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha loo shaqeeyaha iyo u shaqeeyaha, shaqaalaha dawlada iyo shaqooyinka kale ee la xidhiidha; - Arrimaha ku saabsan Caruurta iyo wixi la xidhiidha (korsashada iyo biilida); -Arrimaha la xidhiidha nidamka xukun fulinta;	40 Maalmood	50 Maalmood	60 Maalmood
				-Arrimaha kale aan ku caddayn halkan;	120 Maalmood	180 Maalmood	210 Maalmood

T	Maxkamada	Fadhiga ay dacwaddu ka qabsoomayso	Geeddisocodka dacwadaha bilow ila dhammaad	Nooca dacwadda	Sar-goynta muddada kama dambaysta ee geeddi-socodka dacwadaha madaniga iyo natiijada la filayo		
					Muddada bilawga 85%	Muddada dhexdhexadka 95%	Muddada guud ee kama dambaysta 100%
2	Maxkamadda guud ee DDS	Fadhiga dib-u-egista hore	Laga bilaabo maalinta faylka la furay ama maalinta soo dhawaw la dhahay	-Arrimaha ku salaysan heshiiska -Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka ka baxsan heshiiska;	---------	-------	90 Maalmod
				-Arrimaha la xidhiidha dhaxalka; -Arrimaha la xidhiidha qoyska, furiinka iyo asbaabaha ka dhasha iyo wixii la xidhiidha;	---------	-------	90 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga. -Arrimaha ku salaysan tartanada ganacsiga iyo xuquuqda quutayasha;	-- -----	------	90 Maalmood
				- Khilaafadka la xidhiidha lahaansha hantida, gacan ku haynta iyo arrima la xidhiidha heshiiska (konteradka)	---------	-------	90 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha loo shaqeeyaha iyo u shaqeeyaha, shaqaalaha dawlada iyo shaqooyinka kale ee la xidhiidha; -Arrimaha la xidhiidha Caruurta iyo (Korsashada iyo biilida). - Arrimaha la xidhiidha nidamka xukun fulinta	----------	---------	60 Maalmood
				- Arrimaha kale aan halkan ku caddayn ;	-------	------	90 Maalmood

2. MAXKAMADDAHA SARE EE GOBOLADA

T.R	Maxkamada	Fadhiga ay dacwaddu ka qabsoomayso	Habsocodka dacwadaha bilow ila dhammaad	Nooca dacwadda	Sar-goynta muddada kama dambaysta ee geeddi-socodka dacwadaha madaniga iyo natiijada la filayo		
					Muddada bilawga 85%	Muddada dhexdhexadka 95%	Muddada guud ee kama dambaysta 100%
1	Maxkamadda sare ee gobolada DDS	Habsocodka kiiska caadiga	Laga bilaabo Maalinta faylka la furay ilaa iyo maalinta go'aanka la siiyay	-Arrimaha la xidhiidha heshiisyada;	210 Maalmood	270 Maalmood	365 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha Dhismaha;	210 Maalmood	365 Maalmood	425 Maalmood
				-Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka heshiiska ka baxsan;	270 Maalmood	365 Maalmood	485 Maalmood
				-Arrimaha ku salaysan shuruucda ganacsiga -Arrimaha la xidhiidha, furiinka; -Arrimaha la xidhiidha dhaxalka;	180 Maalmood	270 Maalmood	365 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha khilaafka;	90 Maalmood	105 Maalmood	120 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha gacan ku haynta;	300 Maalmood	425 Maalmood	485 Maalmood
				-Arrimaha kale aan halkan lagu caddaynin	180 Maalmood	270 Maalmood	365 Maalmood
				-Arrimaha ku saabsan habka xukun fullinta	90 Maalmood	180 Maalmood	365 Maalmood

TT	Maxkamadda	Fadhiga ay dacwaddu ka qabsoomayso	Habsocodka dacwadaha bilaw ila dhammaad	Nooca dacwadda	Sar-goynta muddada kama dambaysta ee geeddi-socodka dacwadaha madaniga iyo natiijada la filayo		
					Muddada bilawga 85%	Muddada dhexdhexadka 95%	Muddada guud ee kama dambaysta 100%
2	Maxkamadda Sare Gobolada	**Dacwadaha Racfaanka ee dacwadaha madaniga**	Laga bilaabo Maalinta faylka la furay ilaa iyo maalinta go'aanka la siiyay	- Arrimaha la xidhiidha heshiisyada -Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga.	120 Maalmood	180 Maalmood	210 Maalmood
				Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka ee ka baxsan heshiiska	90 Maalmood	180 Maalmood	210 Maalmood
				-Arrimaha la xidhiidha furrinka iyo asbaabaha ka dhasha; -Arrimaha la xidhiidha go'aanada maamulka iyo xubnaha kale ee xafiisku ay fulliyan. -Arrimaha la xidhiidha shuruucda Maamulka;	120 Maalmood	150 Maalmood	180 Maalmood
				- Arrimaha la xidhiidha khilaafadka Shaqada; -Arrimaha la xidhiidha xukun Fullinta;	30 Maalmood	45 Maalmood	60 Maalmood
				Khiilaafadka la xidhiidha gacan ku haynta, iyo lahaanshaha	90 Maalmood	105 Maalmood	120 Maalmood
				-Arimaha kale aan halkan lagu caddaynin	120 Maalmood	150 Maalmood	180 Maalmood

3. MAXKAMADAHA DEGMOOYINKA DDS

T.R	Maxkamadda	Fadhiga ay dacwaddu ka qabsoomayso	Habsocodka Dacwadda bilaw illaa dhammaad	Nooca Dacwadda	Sar-goynta muddada kama dambaysta ee geeddi-socodka arrimaha madaniga iyo natiijada la filayo		
					Muddada bilawga 85%	Muddada dhexdhexadka 95%	Muddada guud ee kama dambaysta 100%
1	Maxkamadda Degmada	Dacwadda loo soo gudbiyo maxkamada degmada si ay uga garnaqdo	Laga bilaabo Maalinta faylka la furay ilaa iyo maalinta go'aanka la siiyay	Arrimaha la xidhiidha korsashada	10 Maalmood	20 Maalmood	30 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha furriinka	90 Maalmood	150 Maalmood	180 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha hantida ninka iyo xaska	90 Maalmood	270 Maalmood	300 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha caddaynta Ilmaha	10 Maalmood	30 Maalmood	50 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha khiyaanada (ilmaha, aabonimada, xaasnimada ama burinta meherka)	90 Maalmood	135 Maalmood	180 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha heshiisyada;	180 Maalmood	280Maalmood	300 Maalmood
				Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka heshiiska ka baxsan	180 Maalmood	240 Maalmood	350 Maalmood
				Khilaafadka la xidhiidha gacan ku haynta iyo heshiisyada kiraynta guryaha;	90 Maalmood	105 Maalmood	120 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha Anshaxa;	60 Maalmood	75 Maalmood	90 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha baankiga iyo caymiska	90 Maalmood	150 Maalmood	180 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga	150 Maalmood	240 Maalmood	300 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha xaqiijinta dhaxalka	120 Maalmood	150 Maalmood	210 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha qaybinta dhaxalka	90 maalmood	150 Maalmood	180 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidha khilaafyada shaqada	40 Maalmood	50 Maalmood	60 Maalmood
				Arrimaha la xidhiidhsa Fulinta xukunka	90 Maalmood	180 Maalmood	365 Maalmood

LIFAAQ -LABAAD

SAR-GOYNTA JADWALKA IYO HALBEEGYADA CABBIRKA WAXQABADKA

1. HEERKA BAADHISTA DACWADAHA:-

Waxaa lagamamaarmaana in xaddiga baadhista waxqabadka la miisaamo. Waxaa loo baahan yahay muddada la jaangoyay in ay isku-dheelitirmaan kiisaska (dacwadaha) la xaliyay ee go'aanka helay iyo kuwa cusub ee la furay.

Haddii muddadi loogu talo galay marka lagaadho ay isku dheelitirnaan waayan kiisaska (dacwadaha) la xaliyay ee go'aanka helay iyo kuwa cusub Ee la furay, islamarkaana kiisaska la xaliyay ee go'aanka helay ay ka yaraadan, kiisaska cusub ee la furay waxay caddaynaysaa in kiisas ay soo Baxayaan islamarkaana baaxadoodu ay si kordhayso.

Qeexida jadwalka iyo halbeegyada cabbirka waxqabadku waa sida soo socota;

Heerka baadhitaan ee dacwadda boqolkiba (%) = **muddada go'aanka uu helay (hal sanno) dacwadaha go'aanka helay** × **100**
Hal mar gudahed lagu go'aamiyay (hal sanno) guud ahan faylasha cusub ee la furay

2. MUDDADA XALKA LAGU GAADHAY:-

Arrimaha go'aanka helay muddadi loogu talo galay, Si loo kala saaro boqolkiiba, waxaa la adeegsanaya habkan/ qaaciidadan soo socota;

Muddada xalka lagu gaadhay boqolkiba = **baaxada kiisaska lagu dhammeeyay muddada kama dambaysta** X **100**
Guud ahan baaxada kiisaska xalka helay;

3. CIDDO-TIRSIGA KIISASKA-

Ciddo-tirsigu wuxuu ku saabsan yahay arrimaha aan lagu xalinin muddadi loogu talo galay, islamarkaana wali socda. Cabbirka ciddad – tirsiga kiisaska socda waxay noqonayaan laga bilaabo taariikhda furitaanka diiwaanka kiiska ilaa muddada fullinta. Haddaba waxaa la adeegsanaya qaaciidadan soo socota;

$$\text{Ciddad-tirsiga kiisaska} = \frac{\text{Kiisaska lagu dhammeeyay muddadi loogu talo galay iyo kiisaska taagan X 100}}{\text{Guud ahaan Kiisaska Taagan}}$$

LIFAAQA - SADDEXAAD

FOOMKA LA SOCODKA IYO WARBIXINTA WAXQABADKA

1. Foomka faah-faahinta warbixinta kiisaska fadhi racfaanka ee xalka helay iyo kuwa aan xalka helin muddadi loogu talogalay,

HABKA *(TRACK)*	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka - 1	-Arrimaha la xidhiidha heshiisyada -Arrimaha ku salaysan cilaaqadka heshiiska ka baxsan;	180 Maalmood gudahood		
		240 Maalmood gudahood		
		300 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *300 maalmood ka badan tahay		
Habka - 2	- Arrimaha la xidhiidha dhaxalka; - Arrimaha la xidhiidha furrinka (ninka Iyo naagta) iyo asbaabaha ka dhasha;	180 maalmood gudahood		
		210 maalmood gudahood		
		270 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *270 maalmood ka badan tahay		
Habka - 3	Khilaafaadka la xidhiidha gacan ku haynta hantida, kiraynta, iyo heshiska (kontiradka);	150 maalmood gudahood		
		210 maalmood gudahood		
		240 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *240 maalmood ka badan tahay		
Habka - 4	-Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga; -Arrimaha la xidhiidha tartanada ganacsiga iyo xuquuqda quutayasha;	120 maalmood gudahood		
		180 maalmood gudahood		
		210 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *210 maalmood ka badan tahay		
Habka- 5	-Arrimaha la xidhiidha habka xukun fullinta; -Arrimaha la xidhiidha khilaafadka shaqada, Loo shaqeeyaha iyo ushaqeeyaha, arrimaha shaqaalaha dawladda iyo arrimaha kale ku salaysan xidhiidhyo shaqo; -Arrimaha caruurta (Biilidda iyo korsashada)	60 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
Habka 6	Arrimaha kalen halkan lagu xusin	120 maalmood gudahood		

		150 maalmood gudahood	
		210 maalmood gudahood	
		Arrimaha muddadoodu ay *210 maalmood ka badan tahay	

2. **Foomka faah-faahinta warbixinta kiisaska dib-u-eegista ee xalka helay iyo kuwa aan xalka helin muddadi loogu talogalay;**

HAB *TRACK*	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka - 1	Arrimaha la xidhiidha heshiisyada;	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -2	Arrimaha ku saabsan xidhiidhka ee heshiiska ka baxsan;	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -3	Arrimaha la xidhiidha dhaxalka;	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -4	Arrimaha la xidhiidha furrinka ninka iyo naagta iyo asbaabaha ka dhasha;	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -5	Khilaafadka ku saabsan gacan ku hantida, kiraynta, iyo heshiska (kontiradka).	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -6	Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -7	Arrimaha la xidhiidha habka xukun fullinta	60 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
Habka -8	Arrimaha la xidhiidha khilaafadka shaqada,loo shaqeeyaha iyo ushaqeeyaha, arrimaha shaqaalaha dawladda iyo arrimaha kale ee ku saabsan xidhiidhyo shaqo	60 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
Habka - 9	Arrimaha caruurta (Biilidda iyo korsashada)	60 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
Habka 10	Arrimaha kale aan halkan lagu caddaynin	90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		

3. **Foomka Faah-faahinta warbixinta kiisaska racfaan ee xalka helay iyo kuwa aan xalka helin muddadi loogu talogalay ee fadhiga racfaanka maxkamadda guud.**

HAB *(TRACK)*	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka -1	Arrimaha la xidhiidha heshiisyada	120 Maalmood gudahood		
		210 Maalmood gudahood		
		270 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *270 maalmood ka badan tahay		
Habka - 2	Arrimaha la xidhiidha dhaxalka;	120 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		240 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *240 maalmood ka badan tahay		
Habka - 3	Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga;	120 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		240 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *240 maalmood ka badan tahay		
Habka - 4	Khilaafadka la xidhiidha gacan ku haynta hantida, kiraynta, iyo heshiska (kontiradka);	120 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		210 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *210 maalmood ka badan tahay		
Habka - 5	Arrimaha la xidhiidha furrinka ninka iyo naagta iyo asbaabaha ka dhasha;	120 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		240 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *270 maalmood ka badan tahay		
Habka - 6	Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka heshiiska ka baxsan;	120 Maalmood gudahood		
		210 Maalmood gudahood		
		270 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *270 maalmood ka badan tahay		
Habka - 7	Arrimaha la xidhiidha habka xukun	60 Maalmood gudahood		

	Fullinta;	Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
Habka - 8	-Arrimaha caruurta (Biilidda iyo korsashada) -Arrimaha la xidhiidha khilaafadka shaqada, loo shaqeeyaha iyo ushaqeeyaha, arrimaha shaqaalaha dawladda iyo Arrimaha kale ku saabsan xidhiidhyo shaqo;	40 Maalmood gudahood		
		50 Maalmood gudahood		
		60 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
		210 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *210 maalmood ka badan tahay		

4. Foomka Faah-faahinta warbixinta kiisaska tooska ah ee xalka helay iyo kuwa aan xalka helin muddadi loogu talogalay ee fadhiga maxkamadaha sare ee gobolada DDS.

HAB (*TRACK*)	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka - 1	Arrimaha la xidhiidha heshiisyada;	210 maalmood gudahood		
		270 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *365 maalmood ka badan tahay		
Habka – 2	Arrimaha ku salaysan cilaaqaadka heshiiska ka baxsan	270 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		485 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *485 maalmood ka badan tahay		
Habka- 3	Arrimaha la xidhiidha dhismaha (Construction)	210 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		425 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *425 maalmood ka badan tahay		
Habka - 4	-Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga -Arrimaha la xidhiidha furrinka (ninka iyo naagta) iyo asbaabaha ka dhasha; -Arrimaha la xidhiidha dhaxalka;	180 maalmood gudahood		
		270 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *365 maalmood ka badan tahay		
Habka -5	-khilaafadka ku salaysan ka qaadista;	90 maalmood gudahood		

		105 maalmood gudahood		
		120 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *120 maalmood ka badan tahay		
Habka - 6	Arrimaha ku saabsan gacan-ku haynta	300 maalmood gudahood		
		425 maalmood gudahood		
		485 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *485 maalmood ka badan tahay		
Habka- 7	Arrimaha la xidhiidha xukun fullinta	90 maalmood gudahood		
		180 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay*365 maalmood ka badan tahay		
Habka - 8	Arrimaha kale aan halkan ku caddayn	180 maalmood gudahood		
		270 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu ay *365 maalmood ka badan tahay		

5. **Foomka Faah-faahinta warbixinta kiisaska racfaan ee xalka helay iyo kuwa aan xalka helin muddadi loogu talogalay ee fadhiga racfaanka maxkamadaha sare ee gobolada DDS**

HAB *(TRACK)*	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka - 1	- Arrimaha la xidhiidha heshiisyada; - Arrimaha la xidhiidha shuruucda ganacsiga;	120 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		210 Maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu *120 maalmood ay ka badan tahay		
Habka - 2	-Arrimaha ku salaysan Cilaaqadka heshiiska ka Baxsan;	90 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		210 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu *210 ay ka badan tahay		
Habka - 3	-Arrimaha la xidhiidha furriinka iyo asbaabaha ka dhasha, -Arrimaha ku saabsan go'aanada maamulka iyo xubnaha kale ee xafiiska; - Arrimaha la xidhiidha shuruucda maamulka;	120 Maalmood gudahood		
		150 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu *180 maalmood ay ka badan tahay		
Habka- 4	- Arrimaha la xidhiidha khilaafadka shaqada; - Arrimaha la xidhiidha habka xukun fullinta;	30 Maalmood gudahood		
		45 Maalmood gudahood		
		60 Maalmood gudahood		
		Arrimah muddadoodu *120 maalmood ay ka badan tahay		
Habka- 5	Arrimaha la xidhiidha khilaafka gacan ku haynta hantida,	90 Maalmood gudahood		
		105 Maalmood gudahood		
		120 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu *120 maalmood ay ka badan tahay		
Habka-6	Arrimaha kale aan halkan lagu caddaynin	120 Maalmood gudahood		
		150 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu *180 maalmood ay ka badan tahay		

6. **Foomka Faah-faahinta warbixinta kiiska xalka helay iyo kuwa aan xalka helin muddadi loogu talogalay ee fadhiga maxkamadaha Degmooyinka DDS;**

HAB (TRACK)	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka - 1	-Khilaafadka ku salaysan ka qaadista;	10 Maalmood gudahood		
		20 Maalmood gudahood		
		30 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu*30 maalmood ay ka badan tahay		
Habka- 2	-Arrimah ku salaysan furrinka; ninka iyo Naagta;	90 Maalmood gudahood		
		150 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu*180 maalmood ay ka badan tahay		
Habka - 3	Khilaafka la xidhiidha hantida u dhaxaysa ninka iyo naagta	90 Maalmood gudahood		
		270 Maalmood gudahood		
		300 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu*180 maalmood ay ka badan tahay		
Habka - 4	Arrimaha la xidhiidha caddaymaha aabaha iyo Ilmaha	10 Maalmood gudahood		
		30 Maalmood gudahood		
		50 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu *180 maalmood ay ka badan tahay		
Habka - 5	Arrimaha la xidhiidha khiyaanada የመካድ ክስ (ልጅነት፣አባትነት፣ሚስትነት፣ባልነት ውሳኔ ይሰረዝ)	10 Maalmood gudahood		
		30 Maalmood gudahood		
		50 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu *180 maalmood ay ka badan tahay		

HABKA (TRACK)	NOOCA DACWADDA	MUDDADA	KIISASKA XALKA HELAY BOQOLKIBA (%)	KIISASKA AAN XALKA HELIN BOQOLKIBA (%)
Habka - 6	Arrimaha la xidhiidha heshiisyada	180 Maalmood gudahood		
		280 Maalmood gudahood		
		300 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *300 maalmood ay ka badan tahay		
Habka- 7	Arrimaha ku salaysan cilaaqaad aan heshiis ahayn	180 Maalmood gudahood		
		240 Maalmood gudahood		
		350 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *350 maalmood ka badan tahay		
Habka - 8	Khilaafadka ku salaysan gacan ku haynta hantida, kiraynta, iyo heshiska (kontiradka)	90 Maalmood gudahood		
		105 Maalmood gudahood		
		120 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *120 maalmood ka badan tahay		
Habka -9	Arrimaha la xidhiidha anshaxa	60 Maalmood gudahood		
		75 Maalmood gudahood		
		90 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *90 maalmood ka badan tahay		
Habka -10	Arrimaha la xidhiidha bankiga iyo caymiska	90 Maalmood gudahood		
		150 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *180 maalmood ka badan tahay		
Habka-11	Arrimaha ku salaysan shuruucda ganacsiga	150 maalmood gudahood		
		240 maalmood gudahood		
		300 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *300 maalmood ka badan tahay		
Habka-12	Arrimaha la xidhiidha caddaymaha dhaxalka;	120 maalmood gudahood		
		150 maalmood gudahood		

		210 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *210 maalmood ka badan tahay		
Habka-13	Arrimaha ku salaysan dhaxal qaybsig;	90 Maalmood gudahood		
		150 Maalmood gudahood		
		180 Maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *180 maalmood ka badan tahay		
Habka-14	Hh Arrimaha ku salaysan khilaafka shaqada	40 maalmood gudahood		
		50 maalmood gudahood		
		60 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *60 maalmood ka badan tahay		
Habka-15	Arrimaha la xidhiidha habka xukun fullinta	90 maalmood gudahood		
		180 maalmood gudahood		
		365 maalmood gudahood		
		Arrimaha muddadoodu ay *365 maalmood ka badan tahay		

GINBOOT 2015
JIGJIGA, ETHIOPIA

MADBACADDA DELTA JET
Printing & Advertising